

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Dadka ku cusub Swiidhan

Qaxootiga buuxiyey 18 sano ee hasta kaadhka LMA-da oo shaqeynaaya waxa u furan "daryeelka degdega iyo daryeelka aan la sugi karin". Dhakhtarka ayaa go'aaminaaya in ay muhiim tahay in lagu siiyo daryeel markaad xanuunsato ama dhaawacanto. Xeer midkaa la mid ah ayaa ka shaqeynaaya daryeelka ilkaha iyo daryeelka degdega ah.

Caruurta qaxootiga iyo dhalinyarada ka yar 18 sano waxa ay xuq u leeyihiin daryeelka la midka ah tan carruurta dagen Swiidhan. Waxa kale oo uu Golaha Deegaanku uu siinayaa daryeel lacag la'aan ah markuu ilmahu buuxiyo 19.

Dhamaan dadka waaweyn ee qaxootiga ah iyo carruurta is qarinaaya waxay xaq u leehiyiin baadhitaan caafimaad.

Qaxootiga uurka leh daryeelka inay ku umulaan iyo daryeelka hooyada. Waxa kale ood xaq u leedahey talooyinka sida uurka loo baajiyo iyo daaweyn hadii aad ilmaha soo tuurto. Daryeelkani waa sido kale lacag la'aan.

Kharashka laga qaadaayo qaxootiga

- Balanta dhakhtarka ee rugaha caafimaadka guud ama daryeel caafimaad oo lagu soo gudbiyey qiimahiisu waa SEK 50.
- Daryeelka caafimaadka ee kale qiimahiisu waa SEK 25 markuu dhakhtarku ka shaqeeya habka daryeelka caafimaadka ku soo gudbiyo.
- Hadii aad booqato gargaar degdeg ah ama dhatar takhasus leh adigoo lagu soo gudbin waa inaad bixiso qiimaha kharashka guud ee bukaan socodka.
- Qaxootiga waxay xaq u leeyihiin safar lacag la'aan ah oo marka lagu socdo ama laga imanaayo xarumaha caafimaadka ee ay leehyiin Golaha Deegaanku. Waxaad bixinaysaa ugu badnaan SEK 40 halkii safar ee kastaba.

Warbixinta waxaad ku heli kartaa luqado kala duwan Xafiiska Caymiska Bulshada ee Gobolka www.forsakringskassan.se/privatpers/ny_i_sverige



Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Xafiiska Caymiska Bulshada ee Gobolka waxa kale ood qabsan kartaa in toban lagugu oo kala duwan lagugu soo Waco. Waxaad ku heli kartaa warbixin Soomaali hadaad soo wacdo 0771 524 524.